Ilaahay waa jecel yahay Adoonka taqiga ah oo qaniga ah ee qarsoon

Sacad Binu Abii Waqaas Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay waxaan ka maqlay isagoo dhahaya: "Ilaahay waa jecel yahay Adoonka taqiga ah oo qaniga ah ee qarsoon".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Ilaahay casa wajala Adoomadiisa uu qaar jecel yahay. Waxaa ka mida kan taqiga ah: ee amarka Ilaahay ku taagan, kana fogaada wixii Ilaahay ka reebay. wuxuu jecel yahay kan qaniga ah: waa kan Ilaahay casa wajala kaga kaaftooma dadka oo Ilaahay mooyee aan cid kale eegayn. Ilaahay wuxuu jecel yahay kan qarsoon: ee tawaaduca ee rabigi caabuda oo ka shaqeeya wixii isaga anfacaaya, kaaso aan ahmiyad siinin in qofna barto ama la sheeg sheego oo la amaano.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/5545